

Xeerka Golaha Sare Kacaanka lamba. 36 ee 2 Nofember 1969

Visaha Dal ka bixidda lagu dhufto Bassaboorada kuwa aan la jaanqaadin Xafiiska Canshurta

GOLAHA SARE EE KACAANKA

Kadib markii la arkay Axdiga Kowaad ee Kacaanka 21 Oktoober 1969 oo awoodda sharci dejinta, garsoorka iyo fulinta siinaya Golaha Sare ee Kacaanka;

Kadib markii la garoowsada baahidda in la helo hab degdeg ah oo lagu qaabili karo canshuur aruurinta;

Kadib markii la arkay warbixinta Guddiga Canshuuradka oo lagu dhisay amarka Golaha Sare ee Kacaanka ee 23 Oktoober 1969;

Kadib markii la dhegestay talada Golaha Sare ee Kacaanka.

WAXAA LA SOO SAARAY

Qod. 1

Waxaa la soo saaray amarrada hoos ku tilmaaman:

1. Waxaa la joojiyey in shabbada dal ka bixista Dalka loogu dhufto basaboorada kuwa aanan bixinin canshuurta. Sidas awgeed waxaa laga rabaa Xafiiska Canshuurta Tooska iyo Canshuurta Ganacsiga dhexe iyo kuwa gobollada in ay qoraal caddeynaya in dhinaca canshuurta uu si joogto u bixiyo;
2. Qeybta Socdaalka ee Ciidanka Booliska iyo xafiisyadiisa waa in ay ka xayiraan ku dhufashada dal ka dhoofista Dalka dibediisa haddii uu canshuur bixiya uusan haysanin shahaadada canshuurta in la bixiyey in uu gutay wajiibaadka canshuur bixin. Shahaadadan waa in la muujiya shahaadada bariitaanka waxaana lagu hayn doona Qeybta Socdalka, fayla ciddi ay khuseyso.

Qod. 2

Waxaa loola jeeda sharci ahaan erayga “canshuur bixiye” ciddii shaqsi ah ama shaqsi qeynuuni ah, Somali ama ajnabi, oo wax soo saarta ama hesha lacag mushaar ama faa’ido howl si joogta ah ama ku meel gaarka qabto dalka gudahiisa ama si kale ku soo gasha.

Qod. 3

Waxaa laga reebay wajiibka in ay muujiyaan shahaadada canshuurta:

1. — Saraakiisha dibloomasiinta iyo qunsuliyada dowladaha kale;
2. — Saraakiisha iyo shaqaalaha Qaraamada Midobay iyo hey’adaha caalamiga sida ku arifan Heshiisyada caalamiga ah.

Qod. 4

Sacaadaha kasnadaha Xafiisyad Canshurta Toos ah iyo Canshurta ganacsiga qeybaha Dhexe iyo Goblada waxay socon doonta ilaa 14.00 ee maalin-shaqadeedka, iyadoo galabtiina laga bilaabo laga bilaabo 16.00 ilaa 18.00 oo la xiri doono, si loo sahloin canshuur bixiyeyaalku xafiisyadasi yimaadan si ay u gutaan waajibaadkoodka.

Qod. 5

Sharcigaan wuxuu hirgeli doona maalinta ku xigta kadib markii lagu soo faafiyey Faafinta Rasmiga;

Waxaa la faraaya cid kasto in ay u hoggansanaadan sharcigan uuna hoggamiyaancidska eek u nool Jamhuuriyadda Diuqratiga Somaliya.

Muqdisho, 2 Nofember 1969.

Madaxweynaha
Golaha Sare ee Kacaanka
Sareeye Guuto Mohamed Siyad Barre